Macluumaad ku saabsan Dheefta Guriyeynta iyo Dheefta Cashuurta Kawnsalka oo loogu talo-galay kireeye-yaasha iyo wakiilada

(Housing and Council Tax Benefits – information for landlords and agents)

Waxan u qornay warqaddan-yare daabacan koreeye-yaasha iyo wakiilada. Qawaaniintu waa heer qaran waana isku mid meelkasta ood ku nooshahay. Haddii aanad garanayn kawnsalka ku shaqada deegaanka aad ku nooshahay, waxad ka heli karaysaa biil-kaaga Cashuurta Kawnsalka.

Waa maxay Dheef Guriyeyn?

Badanaa way adkaan kartaa bixinta kiradu. Dadka uu dakhli-goodu hooseeyo waxay heli karayaan caawimo ay kirada iskaga bixiyaan. Taasi ayaa la yidhaa Dheef Guriyeyn. Dheefta Guriyeyn waxa weeye dheef qaran, taasi ooy la macaamilaan kawnsalada deegaanku.

Ayaa codsan karayaa Dheef Guriyeyn?

Qof kasta uu dakhligiisu hooseeyo oo kiro ka bixiya guriga ay sida caadiga ugu nool-yihiin ayaa codsan karayaa Dheef Guriyeyn. Kuwaasi waxa laga yaabaa in ay ka mid yihiin kuwa guriga jiifsada cuntana la siiyo qayb ka ah heshiiska kiraysigooda. Waxa codsan karayaa kiraystaha oo keliya. Adigu ma codsan karaysid. Siuu u- helo Dheef Guriyeyn kiraystuhu waa inuu:

- Ka mas'uul yahay kiro bixinta;
- ugu nool yahay guriga sida hooygiisa caadiga ah;
- codsi u samaysto dheeftiisa.

Waa in aanad u qaadan adiga iyo kiraystahaagu in ay kawnsalku bixinayaan lacagta dheefta ilaa ay qoraal idiiku soo sheegaan.

Kuwee ayaan codsan karayn Dheef Guriyeyn?

Kirayste-yaashu sida caadiga ah ma heli karyaan Dheef Guriyeyn:

- haddii ay la nool yihiin kirana siiyaan cid ehel ah ooy is-xigaan;
- haddii ay xubin qoys ahaan ula noolaan jireen guri kireeyaha;
- haddii ay ka kiraysanayaan guri ay wada lahaan jireen cid ay hore isu-qabi jireen;
- haddii ay ka mas'uul yihiin ilmaha cidda guriga ka kiraysay;
- haddii ay lahaan jireen guriga ay iminka kiraysteen;
- haddii ay guriga ay ku nool yihiin qayb ka yahay shaqadooda;
- haddii ay ku nool yihiin hooy daryeelid; ama
- haddii ay yihiin arday waqti-buuxa wax- barta.

Haddii aanu kiraystahaagu hubin in ay heli karayaan dheef, waa in ay codsi sameeyaan ama la xidhiidhaan kawnsalka ku yaal deegaan-kooda si ay talo-siin dheeraad ah u-helaan.

Waa maxay Cashuur Kawnsal?

Cashuurta Kawnsalku waxa weeye dariiqo lagu bixiyo adeegyada kawnsalka.

Kuwee bixinaya Cashuurta Kawnsalka?

Qofka leh kuna nool guri (lahaade-degane) ama kirayste da'diisu tahay 18 ama ka weyn-tahay oo ku nool guriga ayaa sida caadiga ah xilka bixinta Cashuurta Kawnsalku saaran-yahay.

Waa maxay Dheef Cashuur Kawnsal?

Dadka uu dakhli-goodu hooseeyaa waxay weliba heli karayaan cawimo ay biilka Cashuurta Kawnsalka is-kaga bixiyaan. Taasi ayaa loo yaqaan Dheef Cashuur Kawnsal.

Kuwee codsan karaya Dheef Cashuur Kawnsal?

Lahaade-degane ama kirayste da'diisu tahay 18 ama ka weyn-tahay oo si sharci ah mas'uul uga ah Cashuurta Kawnsalka ayaa codsan karaya Dheef Cashuur Kawnsal.

Kuwee ayaan codsan karayn Dheef Cashuur Kawnsal?

Duruufa-qaarkood, dadka hantida leh laakiin aan guriga ku noolayn waa in ay bixinyaan Cashuurta Kawnsalka. Mana codsan karayaan Dheef Cashuur Kawnsal. Tusaalaha ugu caadisani waxa weeye guri dad badani degan-yihiin (HMO).

HMO waa meel:

- kirayste-yaashu qol ka kiraystaan guri qalabkuna ka dhexeeyo, tusaale ahaan, musqul ama madbakh (ama labadaba)
- kirayste kastaa wuxu leeyahay heshiish kiraysi isaga u gooni ah uu ku yaal magacooda oo keliya.

Guriga ah (HMO) kireeyaha ama cidda guriga leh ayaa ka mas'uul ah bixinta cashuurta Kawnsalka. Hase yeeshe, haddii guriga ay ku jiraan kirayste-yaal, ayaga ayaad kirada ugu daraysaa Cashuurta Kawnsalka. Fadlan la xidhiidh kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga haddii aad u baahan-tahay macluumaad dheeraad ah ama nasteexo.

Sidee ayuu kiraysta-haygu u codsanayaa Dheef Guriyeyn ama Dheef Cashuur Kawnsal?

Kirayste-yaasha qaata Taakulayn Dakhli ama Gunno Shaqo-raadis (dakhli ku-salaysan) waxay la siinayaa foom codsi Guriyeyn iyo Dheef Cashuur Kawnsal (HCTB1) marka ay codsadaan. Waa in ay foom kaasi u diraam Qaybta Dheefta ee Kawnsalka deegaan-kooda. Jobcentre Plus ayaa u sheegi doona hadduu kiraystuhu qaato Taakulayn Dakhli ama Gunno Shaqo-raadis (dakhli ku-salaysan). Meelaha qaarkood nidaam cusub ayey Jobcentre Plus soo bandhigeen kaas uu macnihiisu yahay in codsi Dheef Guriyeyn iyo Dheef Cashuur Kawnsal lagu sameeyo isla foomka Taakulayn dakhli, Gunno Shaqo-raadis ama Dheef Bukaan. Xaaladaha cayn kaasi ah, Jobcentre Plus ayaa diri doona macluumaadka khuseeya ey Kawnsalku u baahan-yihiin si ay go'aan uga gaadhaan Dheef Guriyeyn iyo Dheef Cashuur Kawnsal.

Haddii uu kiraysta-haagu codsado Lacag Hawlgab-nimo, waxa la weydiin doonaa haddii ay doonayaan in ay foomka codsiga Lacagta Hawlgabka ku dalbadaan Dheef Guriyeyn iyo Dheef Cashuur. Haddii ay ku codsadaan tilifoon, la taliyaha ayaa waydiin doona haddii ay doonayaan in ay codsadaan Dheef Guriyeyn ama Dheef Cashuur Kawnsal (ama labadaba). Markaas ka dib Adeega Hawl-gabka ayaa soo diri doona foomka HCTB1(PC). Waxa loo baahan-yahay in foomka ay buuxiyey u- diraan Kawnsalka ku yaal deegaan-kooda. Waxad ka heli karaysaa cinwaan-kooda biil-kaaga Cashuurta Kawnsalka ama Buuga Tilifoonka.

Haddii uu kiraysta-haagu dib ugu celiyaan Jobcentre Plus ama Adeega Hawl-gabka, ayaga ayaa u gudbin doona foomka kawnsalka degaanka. Maaha kiraysta-haagu in uu qaato Taakulayn Dakhli, Gunno Shaq-raadis (dakhli ku salaysan) ama Lacag Hawlgab-nimo si ay u helaan Dheef Guriyeyn ama Dheef Cashuur Kawnsal (ama ladaba). Xaaladaha noocaasi ah si toos ah ayey uga codsan karayaan Dheef Guriyeyn ama Dheef Cashuur Kawnsal (ama labadaba) kawnsalka ayaga oo buuxinaya foom codsi. Kawnsalka ayey waydiisan karayaan foom. Waxad ka heli karaysaa faah-faahinta loola xidhiidhayo biil-kaaga Cashuurta Kawnsalka ama Buuga Tilifoonka.

Marka ayey buuxiyaan foomka, waa in ay usoo celiyaan sida ugu dakhsaha badan.

Waa maxay macluumaadka aydu u baahan-tihiin si aydu u xisaabisaan dheefta?

Marka aanu helno codsi Dheef Guriyeyn ama Dheef Cashuur Kawnsal (ama labadba), waxanu u baaha-nahay in aanu ogaano:

- kiraystaha iyo cidda ay is-qabaan dakhligooda iyo kayd-kooda, haddii ay qaataan Taakulayn Dakhli ama Gunno Shaqo-raadis (dakhli ku salaysan mooyaane) ama lacag Hawl-gab-nimo mooyaane;
- duruufaha qoyska kiraystaha, ooy ka mid tahay tafaasiisha cidda guriga kula nool, iyo
- kirada kiraystaha.

Waxa kale oo loo baahan-yahay in ay keenaan caddaynta lambar Caymis Qaran iyo aqoonsi ay leeyihiin ayaga iyo cidda ay is-qabaan.

Waa maxay caddaynta kirada aydu u-baahan-tihiin?

Waxanu u baaha-nahay caddayn kirada kiraystuhu bixinayo. Taasi waxa weeye sida caadiga ah heshiishka kiraysi, laakiin waxay weliba noqon karaysaa buug kiro ama warqad aad adigu soo dirto. Cadaynta waa in ay ka mid noqoto:

- guriga ay kiraysanayaan cinwaankiisa oo buuxa;
- magaca iyo cinwaanka kireeyaha oo buuxa;
- magaca iyo cinwaanka wakiil kasta;
- magaca dhammaan kirayste-yaasha;
- taariikhda bilowga kiraysiga;
- qadarka kharashka kirada;
- sida kirada loo bixinayo, tusaale ahaan, toddobaadle, afar-toddobaadle, biloodle;
- waxa kirada ku jira, tusaale ahaan, cunno, gaas, koranto, kharashyo biyo iyo qadarka lacagta ah ee lagu soo dallacdo adeegyadan;
- taariikhda waraaqaha la saxeexay;
- muddada kiraysigu soconayo;
- saxeexaaga; iyo
- saxeexa kiraystaha.

Waxa weliba faa’ido leh hadaad tafaasiil ka bixiso wixii deyn kiro ka hadh ah aad ku leedahay kiraystaha.

Ma daboolaysaa Dheefta Guriyeyn kirada buuxda?

Waxa laga yaabaa in aanay Dheefta Guriyeyn daboolin kirada buuxda eed soo dallacato. Waa in uu kiraystuhu bixiyo wixii ka dhinma.

Haddii ay kirada ku jiraan adeegyo (sida siciro biyood), waxa laga yaabaa in aanu qiimaha kuwaasi ka gooyno kirada ka hor inta aannaan xisaabin Dheefta Guriyeyn.

Waxanu weliba hubin doonaa in aanay kiradu aad u sarayn. Haddii ay aad u sarayso, waxanu dheefta ku xisaabin doonaa tiro kiro ka hoosaysa. Xaaladaha qaarkood waxanu dhimi karnaa tirada aanu ku isticmaalno kirada haddii uu gurigu aad ugu weyn-yahay kiraystaha iyo qoyskiisa.

Sidee ayeydu u go’aamin karaysaan haddii ay kiradu aad u sarayso?

Adeega Kirada ayaa u dejiya heer kiro dhammaan guryaha baaxadkasta oo ay leeyihiin waxana lagu baahiyaa websaytkasta oo ay kawnsalku leeyihiin. Inkasta oo dheefta guriyeynta kirayse-haaga la xisaabin doono ayada oo xisaabta lagu dasano dhakhliga, kaydka iyo tirada inta qof ee guriga la degan, hadana kama badan doonto heerka kirada ugu saraysa ee ay Adeega Kiradu u dejiyeen heerka kiradaasi. Haddii uu kiraysta-haagu u baahan-yahay in caawimaad dheeraad ah laga siiyo kharashka guriyeynooda (sida kirada iyo Cashuurta Kawnsalka), anaga ayey na waydiisan karayaan Go’aan-qaadasho Lacag-bixin Guriyeyn (caawimaad dheeraad ah oo laga siiyo kharashayadaasi).

Miyaan ogaan karayaa Dheefta Guriyeynta ugu saraysa ee uu kiaystahu xaga u leeyahay ka hor inta aanu guriga usoo guurin?

Haa. Dheefta Guriyeynta ugu saraysa ee uu kiraystahu xaqa u leeyahay waxa weeye sicirka Gunnada Guriyeynta Deegaanka (LHA) loo dejiyey tirada qolalka uu baahan-yahay kiraysta-haagu ee ku yaal deegaanka ay ku nool-yihiin. Adeega Kiradu waxay bilkasta baahin doonaan siciro Gunno Guriyeyn Deegaan cusub (LHA) wixii macluumaad dheeraad ah waxad ka eegtaa ‘Tilmaamta Gunnada Guriyeynta Deegaanka ee Kireeye-yaasha iyo Wakiilada’.

Kiraysiyada **aanay** saamayn Gunnada Guriyenta Deegaanku, waxad ka heli karaysaa inta ay tahay kirada aanu isticmaalaynaa si loo xisaabiyo Dheefta Guriyeynta kiraysa-haaga **ka hor** inta aanay go’aansan in ay kiraystaan. Waxad taasi ku ogaan karta adiga oo buuxinaya foomka loo yaqaan go’aan kiraysi hortii (PTD), kaas oo aad anaga naga heli karayso. Faah-faahinta sida aad noola soo xidhiidhayso waxad ka helaysaa Biilka Cashuurta Kawnsalka ama Buuga Tilifoonka Deegaankaaga.

Go’aanka kiraysiga ka horeeyaa ma dammaanad qaadayo in uu kiraysta-haagu heli dooni Dheef Guriyeyn. Hadana weli kiraysta-haagu waa in uu buuxiyaa foomka codsiga oo uu na tuso dhammaan caddaynta aanu u baaha-nahay.

Ka waran uu kiraystahaygu yahay arday?

Ardayda intooda badani ma codsan karayaan Dheef Guriyeyn ama Dheef Cashuur Kawnsal (ama labadaba). Laakiin ardayda qaarkood ayaa laga yaabaa in ay helaa haddii:

- ay yihiin waalidiin keligood ah;
- ay yihiin lamaane haysta caruur ku tiirsan;
- ay yihiin awood-darne; ama
- ay qaataan Taakulayn Dakhli ama Gunno Shaqo-raadis (dakhli-ku-salaysan

Hadduu kiraysta-haagu yahay arday uu doonayo inuu ogaado haddii ay helayaan dheef, waa in ay la xidhiidhaan Kawnsalka ku yaal deegaan-kooda. Waxad ka heli karaysaa tafaasiisha sida loola xidhiidhayo biil-kaaga Cashuurta Kawnsalka ama Buuga Tilifoonka.

Waa imisa Dheefta Guriyeynta kiraysta-haygu helayaa?

Hadduu kiraysta-haagu qaadato Taakulayn Dakhli am Gunno Shaq-raadis (dakhli-ku salaysan) ama dammaanadda qayb Lacag Hawlgab, waxay sida caadiga ah heli doonaan dheefta ugu saraysa. Taasoo ah heerka kirada ugu saraysa iyo dhammaan Cashuurta Kawnsalka, oo laga gooyo wixii kharash kuma-tiirsane ah.

Haddii aanay qaadan Taakulayn Dakhli am Gunno Shaq-raadis (dakhli-ku salaysan) qadarka dheeftu waxay ku xidhan tahay baaxadda dadka guriga wada gala (kirayste, cidda ay is-qabaan iyo wixii caruur ah) iyo dakhli-gooda. Hadduu kiraystuhu, ama cidkasta oo qoyskooda ka mid ahi yahay awood-darni, waxa laga yaabaa in ay helaan dheef dheeraad ah.

Baaxadda dadka kiraystaha guri la galaa waxay saamaynaysaa ‘qadarka lagu dabiqi karayo’ codsi-gooda ey Dawladdu u-malaynayso inuu kiraystuhu u-baahan-yahay siduu ugu noolaan lahaa.

Goorma ayey Dheefta Guriyeyntu bilaamaysaa?

Waxanu si caadiga ah bixinaa dheefta laga bilaabo Isniinta ka dambaysa marka uu kiraysta-haagu sameeyey codsi-gooda (haddii anaga naloo soo gudbiyey ama Jobcentre Plus wixii Taakulayn Dakhli ama Gunno Shaq-raadis (dakhli-ku salaysan) iyo Adeega Hawl-gabka wixii khuseeya Lacag Hawlgab-nimo).

Haddii aanay hubin haday codsan karayaan waa inay codsiga toos noogu soo diraan, xataa haddii ay sugayaan warqado ay ku taageerayaan codsigooda, haddii kale way halayn doonaan lacagta.

Muddo intee leeg ayey dheeftu soconaysaa?

Waxanu siin doonaa dheefta kiraysta-haaga muddo aan xaddidnayn ayaga oo duruuftooda wax isbedeli ku yimaad mooyaane. Marka taasi dhaco, dib ayaanu u-qiimayn doonaa dheefta ay xaqa u-leeyihiin.

Sidee Dheefta Guriyeyn loo bixiyaa?

Dheefta Guriyeynta waxa had iyo jeer la siinayaa kiraystaha. Ayaga ayaa ka mas’uul ah in ay bixiyaan kiradooda. Waxa jira xaalado aad u yar oo aanu adiga kugu siin karayno Dheefta Guriyeynta. Waxanu taasi samayn karaynaa oo keliya haddii aanu u malaynayno in ay mashaakil dhab ahi ka haystaan kiraysta-haaga bixinta kiradooda iyo maamulka lacagtooda. Haddii aad u malaynayso in xaaladda mid ka mid ah kirayste-yaasha ay sidaasi oo kale tahay, waa in aad nala soo xidhiidho.

Maxaan sameeyaa haddii ay kiro ku baaqi tahay kiraysta-hayga?

Nidaamka u yaala Dheefta Guriyeyntu wuxu dhigayaa haddii kiraystaha lagu leeyahay kiro ka badan sideed toddobaad ama ka badan, waa in aanu lacagta kirada si toos ah kuu siino, anaga oo qabna in ay maslaxadi ugu jirto kiraystaha in aan lacagta toos laguu siin mooyaane. Fadlan warqad noo soo dir hadaad ‘kiro’ ah sideed toddbaad ama ka badan ku leedahay kiraystaha si aanu u go’aansano waxa ay yihiin talaabooyinka laga qaadayaa.

Muddo intee leeg ayey ku qaadataa in la xallilo codsi Dheef Guriyeyn?

Dhammaan Maamuladda Maxalliga ahi waa in ay ku bixiyaan Dheefta Guriyeynta muddo 14 cisho ah marka ay helaan dhammaan macluumaadka ay u baahan-yihiin si ay u xisaabiyaan dheefta. Hase yeeshe, inta badan waxa dib u dhaca ku keena dheefta macluumaad aanu ka sugano codsadaha.

Maxaa dhacaya haddii ay isbedelaan duruufaha kiraystuhu?

Waa in adiga iyo kirayste-haagu isla markiiba qoraal noogu soo sheegtaan wixii kasta ee laga yaabo in ay saameeyaan dheeftooda. Hadduu kiraysta-haagu qaatao Taakulayn Dakhli ama Gunno Shaqo-raadis (dakhli ku salaysan) waa in ay sidokale u sheegaan Waaxda Shaqada iyo Hawl-gabka. Haddii ay qaataan Lacag Hawlgab-nimo, waa in ay sidokale isla-markiiba u sheegaan Adeega Hawl-gabka haddii uu dakhligoodu ama kaydkoodu kor u kaco ama hoos u dhaco. Adeega Hawl-gabka ayaa markaasi noo soo sheegi doona.

Tusaalooyin la mid ah isbedelo duruuf waxa weeye:

- haddii cinwaan-kaagu isbedelo;
- haddii ay kiradaadu isbedesho;
- tirada dadka kula nool;
- qof waayeel ahi soo galo guriga ama uu ka baxo;
- ay istaagto Taakulaynta Dakhliga ama Gunnada Shaqo-raadiska (dakhli ku salaysani) kiraystuhu ama
- dakhliga kiraystu kor u kaco ama hoos u dhaco.

Waa in Adiga ama kiraysta-haagu noo soo sheegtaan isla-markiiba dhammaan isbedelada. Waa dembi sida ay dhigayso Qaybta 14 Sharciga 1997 ee Maamulidda Amniga Bulshada (Khiyaano) qofka, daacad-dari ugu guul-daraysta isaga oon cudur-daar maquula u hayn in uu noo soo sheego isbedel ku yimi duruuftiisa kaasoo saamayn kara xaqa ay u leeyihiin Dheef Guriyeyn ama Dheef Cashuur Kawnsal.

Sidee ayaan usoo sheegaa khiyaano dheefeed?

Haddii aad rumaysan-tahay in qof qaato dheef aanu xaq u lahayn, fadlan tilifooni Kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga ama Khada-kulule khiyaano Qaran oo ah 0800 328 6340.

Fadlan nasii macluumaad badan intii awoodaada ah si aad nooga caawiso baadhitaan-kayaga. Wixi macluumaad aad nasiisaa qarsoodi ayuu ahaanaya. Haddii aad doorbidayso waxba ha sheegin magacaaga.

Ka waran haddii Dheef Guriyeyn fara badan lay siiyey?

Haddii aanu bixinay dheef fara badan, waxanu kaa codsan doonaa adiga ama kiraysta-haagu in aydu lacagtaasi dib usoo celisaan. Waxa laga yaabaa in aanu dib ugu soo ceshano lacagta idinku siyaadada ah:

- in laga gooyo qofka ay u socota lacagta dheefta guriyeyntu;
- in aanu ka goosano lacagta aanu kaa siinay kirayste-yaal kale; ama
- in aanu biil kuu soo dirno adiga ama kiraysta-haaga.

Ka waran hadaan anigu ama kiraysta-haygu idinku diido go’aan kasta oo samayseen?

Haddii adigu ama kiraysta-haagu diidan-tihiin go’aan-kayaga, waxa laga yaabaa in aydu rafcaan qaadan kartaan. Xuquuqda ay rafcaanka u leeyihiin kiraystaha iyo kireeyuhu way kala duwan yihiin.

Waxad rafcaan ka qaadan kartaa oo keliya go'aan-kayaga:

- in aanu dheeftaada toos kuu siino iyo in kale; ama
- in aanu go'aanso in aad lacag siyaado kugu ah dib usoo celiso iyo in kale.

Kama qaadan kartid rafcaan qadarka dheefta ama tawaariikhda la ogolaaday in lagu siiyo.

Kirayste-yaashu rafcaan ay ka qaadan karayaan go'aan kasta oo ku saabsan codsiga dheeftooda. Warqadaha aanu usoo dirno ayaanu ugu sheegi doonaa xuquuq-dooda ay u leeyihiin rafcaanka.

Rafcaan kastaa waa in uu noqdo qoraal aad noogu soo dirto muddo bil gudeheeda laga bilaabo warqadda go'aanka. Rafcaan kasta waa in aad ku sheegto waxa aad ugu malaymayso in go'aanku qalad ahaa.

Waa maxay macluumaadka aad iga siinaysaa Dheefta Guriyeynta kiraysta-hayga?

Haddaanu kiraystaha siino Dheef Guriyeyn, wax macluumaad ah kaama siin karayno codsi-gooda, ayaga oo fasax qoraal ah nagu siiya in aanu codsi-gooda kaala hadlo mooyaane. Xataa kuuma sheegi karayno in ay sameeyeen codsi iyo in kale.

Haddii aanu ku siino Dheeftooda Guriyeyn, waxanu kuu sheegi karaynaa:

- taariikhda ay dheeftu bilaamayso iyo taariikhda ay dhammaanayso;
- qadarka toddobaadle ee dheeftu inta tahay iyo inta jeer la bixinayo;
- qadarka lacagta ah ee aanu ka goosanayno dheefta si aanu ula soo noqono siyaadadii la bixiyey; iyo
- taafasiil wixii jeegag toos laguu siiyey.

Haddii aanu wakiil-kaaga toos u siinay dheefta kiraysta-haaga, kuma siin karayno wax macluumaad ah. Waa in aad waydiiso kiraysta-haaga ama wakiilka wixii macluumaad aad u baahan-tahay.

Halkee ayaan ka heli karayaa nasteexo dheeraad?

Haddii aad u baahan-tahay nasteexo dheeraad ah, waxad la xidhiidhaa Kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga waxad ka heli karaysaa magac kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga biil-kaaga Cashuurta Kawnsalka.

Khadka-kulul ee Khiyaanada Qaran

Warqad u dir:
PO Box No 647
Preston PR1 1WA

Tilifoon: 0800 328 6340

websayt: www.targetingfraud.gov.uk

Khadka-kulul ee Khiyaanada: 01225 477874

Nasteexo madax-bannaan

Haddii aad u baahan-tahay talo-siin madax-bannaan,la xidhiidh Xafiiska Talo-siinta Muwaadiniinta ee ku yaal degaanka. Waxad ka heli karaysaa lamabrka tilifoonkooda iyo

wakiilo kale oo dadka degaanka la taliya Buuga Tilifoonadan, maktabada ku taal deegaan-kaaga ama adiga oo la xidhiidhaya Kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga.

Qaabab kale

Waxad ku heli karaysaa macluumaadka ku yaal buugan-yar far waaweyn, far Indhoole, werin cajaladeed iyo luuqado kale. Wixii macluumaad dheeraad ah waxad booqataa websaytka www.benefit-leaflets.org.